

Hagaha Isbarbardhiga Qorshaha Daryeelka La Maareeyo ee Washington Apple Health

Hagaha wuxuu isbarbardhigayaa qorshayaasha daryeelka la maareeyo ee Apple Health (Medicaid). Hoos waxaad ka eegi kartaa:

- Kaarka warbixinta qorshaha
- Adeegyada aasaasiga ah ee la caymiyay
- Shaxda isbarbardhiga dheefaha qiimaha lagu kordhiyay

Isticmaal hagahan si uu kaaga caawiyo doorashada qorshaha daryeelka la maareeyay ee Apple Health (Medicaid) oo si wanaagsan ugu habboon baahiyadaada iyo baahiyada qoyskaaga.

Kaarka Warbixinta Qorshaha Washington Apple Health ee 2023

Kaarkan warbixinta wuxuu muujinayaa sida qorshayaasha Apple Health la isu barbardhigi karo marka laga eego dhanka meelaha waxqabadka muhiimka ah.

Meelaha waxqabadka	Coordinated Care of Washington	Community Health Plan of Washington	Molina Healthcare of Washington	United Healthcare Community Plan	Wellpoint (oo horey loo oran jiray Amerigroup)
Daryeel helid	★★★★	★★★★	★★★★	★★★★	★★★★
Ilaalinta caafimaadqabka carruurta	★★★★	★★★★	★★★★	★★★★	★★★★
Ilaalinta caafimaadqabka haweenka iyo hooyooyinka	★★★★	★★★★	★★★★	★★★★	★★★★
Ka-hortagga iyo maareynta jirooyinka	★★★★	★★★★	★★★★	★★★★	★★★★
Xaqiijinta daryeel habboon	★★★★	★★★★	★★★★	★★★★	★★★★
Ku qanacsanaanta daryeelka dadka waaweyn la siiyo	★★★★	★★★★	★★★★	★★★★	★★★★
Ku qanacsanaanta qorshaha dadka waaweyn	★★★★	★★★★	★★★★	★★★★	★★★★

FURAHA: Waxqabadka oo loo barbardhigay dhammaan qorshayaasha Apple Health	
Celceliska ka sarreeya	★★★★
Celceliska	★★★★
Celceliska ka hooseeya	★★★★

Qiimeyntan waxaa lagu saleeyay macluumaad laga soo ururiyay qorshayaal caafimaad iyo sahannada xubnaha qorshaha caafimaadka ee 2022. (qaar ka mid ah xogta lagu adeegsaday qaybta Daryeel Helidda waxaa laga soo qaatay 2021).

Macluumaadka waxaa saxnaantiisa dib-u-eegay baarayaal madax-bannaan.

Dhibcaha waxqabadka qorshaha caafimaadka lama waafajin kala duwanaanshaha dadka xubnaha ka ah ama gobolada adeegga.

Eeg Kaarka Warbixinta Qorshaha ee Washington Apple Health.

Adeegyada la caymiyay

Dhammaan qorshayaasha daryeelka la maareeyay ee Apple Health waa in ay ka hadlaan adeegyadan aasaasiga ah ee hoos lagu muujijay.






Isbitaal-dhigid	Isbitaal joogidda, oo uu ka mid yahay qaliinka bukaan-jiiifka iyo bogsashada.
Adeegyada xaaladaha degdegga ah	Booqashooyinka lagu tago qolka xaaladaha degdegga ah, oo ay ku jiraan adeegyada gaadiidka degdegga ah ama daaweynta xarunta daryeelka degdegga ah.
Adeegyada socodka la xiriira	Booqashooyinka dhakhtarka marka aad xunuunsan tahay ama dhaawacan tahay, ama booqashooyinka rugta caafimaadka bukaan-socodka.
Daawooyinka uu dhakhtarka dad u qoro	Daawada uu dhakhtarkaaga amro.
Adeegyada sheybaarka	Raajooyinka, MRI-yaa, baaritaannada dhiigga, iwm.
Daryeelka hooyada iyo dhallaanka	Loogu talagalay haweenka u baahan daryeelka dhalimada ka hor ama caawimaadda uurka, dhibaatooyinka, dhalidda.
Adeegyada caafimaadka carruurta, oo ay ku jiraan daryeelka ilkaha iyo indhaha	Baaritaannada ilkaha, booqashooyinka joogtada ah ee dhakhtarka indhaha, ookiyaale, tallaal, iyo in kale.
Adeegyada wanaagga iyo ka hortagga, oo ay ku jiraan maareynta cudurka ba'an	Baaritaannada loogu talagalay waxyaabaha sida lafo-beelka iyo naaso-cabbirka, iyo caawimaadda la noolaashaha jirooyinka waqtiga dheer socda sida cudurka sonkorta.
Adeegyada caafimaadka habdhaqanka	Adeegyada caafimaadka dhimirka iyo daaweynta xanuunka isticmaalka maandooriyaha
Aaladaha iyo adeegyada baxnaaninta	U-jimcinta jirka, hadal ku daaweynta, addimo gacan ku sameys ah, iyo qalab caafimaad kale.






Wax ka ogow adeegyada iyo dheefaha kale ee uu caymiyo Apple Health.






Shaxda Isbarbardhiga Dheefaha Qiimaha Lagu Darey ee Daryeelka La Maareeyay ee Apple Health

Dheefaha Qiimaha Lagu Darey (VAB) waxay bixiyaan taageero dheeraad ah oo aaney ka hadlin Apple Health (Medicaid) waxaana macaamiisha siiya qorshahooda daryeelka la maareeyo.

Qorshayaasha daryeelka la maareeyo qaarkood waxay bixiyaan taageero isuduwid fogaan arag ah ama shakhsi ahaan ah si ay kaaga caawiso in aad hesho kuwan iyo dheefo kale. Dhagsii magacyada qorshaha ee ku yaalla xagga sare ee shaxda si aad u hesho liiska dhammeystiran ee dheefaha uu qorshahani bixiyo. VAB-yada caamka ah ayaa laga helaa shaxda hoose.

Dheefaha Qiimaha Lagu Darey	Coordinated Care 	Community Health Plan of Washington 	Molina Healthcare of Washington 	UnitedHealthcare Community Plan 	Wellpoint Washington (oo horey loo oran jiray Amerigroup) 
Sugnaan La'aanta Cuntada	Taageerada helidda \$100/ sannadkii oo ah fawjarrada miraha iyo khudaarta	N/A	Laba toddobaad oo cuntooyin caafimaadqab leh oo bilaash ah oo laga helo FarmboxRx ka-dib isbitaal joogidda Taageero laga helo cunto-yaqaan iyo barayaal caafimaad diiwaangashan iyadoo loo marayo barnaamijka Caafimaadkeyga (My Health)	Eeg VAB Taageerada Hooyada	Kaarka Xubinnimada Dahabiga ah ee Costco ee bilaashka ah
Taageero Guryeyn	Kasbo ilaa \$200 oo abaal-marin ah oo aad ku isticmaalayso lacagaha kirada iyo adeegyada	N/A	N/A	Barnaamijka On My Way (OMW): wuxuu gacan ka geystaa u diyaarinta xubnaha dhallinyarada in ay gaaraan baahiyadooda guri, shaqo, iyo maareynta maaliyadeed ee mustaqbalka	N/A
Taageerada Kala-guurka ee Jeelka/ Xabsiga	Deeqo loogu talagalay xubnaha in ay ku iibsadaan baahiyada aasaasiga ah, sida cuntada, dharka, iyo walxo kale, si loo taageero kala-guurka lagu guuleystay.	N/A	N/A	Adeegyada goobta ku saleysan marka la heli karo Xubnaha waxay helayaan boorsooyin ay ku jiraan waxyaabaha aasaasiga ah markay ka baxayaan xabsiga	Laabtoob Bilaash ah \$100 oo loogu talagalay Internet/tiknoolajiyadda

Dheefaha Qiimaha Lagu Darey	Coordinated Care of Washington, Inc 	Community Health Plan of Washington 	Molina Healthcare of Washington 	UnitedHealthcare Community Plan 	Wellpoint Washington (oo horey loo oran jiray Amerigroup) 
Taageero Hooyonimo	<p>Kuriga gaariga ama Pack and Play oo bilaashka ah iyo caawimaadda sariirta ilmaha yar</p> <p>Kaalmada foosha iyo qorsheynta (Doula) loogu talagalay taageero jireed iyo mid dareen taageero naas-nuujin ayaa fiidiyow ahaan loo heli karaa 24/7</p> <p>Taageero lagu yareynayo sigaar cabidda (Uur-qaadid Sigaar La'aan Ah/Puff-Free Pregnancy)</p> <p>Sahayd saddex bilood ah oo loogu talagalay faytamiinnada dhalmada ka hor</p> <p>Ka dooro mashiinka naaska lagu liso oo elektaroonig ah ama gacanta ku shaqeeya</p>	<p>Faytamiinada dhalmada ka hor</p> <p>Barnaamijka Adigoo Caafimaadqaba, Ilmaha Caafimaadqaba (Healthy You, Healthy Baby) oo leh maamulayaal kiis gaar ah oo loogu talagalay taageero dheeraad ah oo la xiriirta baahiyada uurka la xiriira</p> <p>Ka dooro mashiinka naaska lagu liso oo elektaroonig ah ama gacanta ku shaqeeya</p>	<p>Faytamiinada dhalmada ka hor</p> <p>Balanta Text4baby oo bilaash ah iyo macluumaadka caafimaadka ee loogu talagalay uurka caafimaadqabka leh</p> <p>Ka dooro mashiinka naaska lagu liso oo elektaroonig ah ama gacanta ku shaqeeya</p>	<p>Kursiga gaariga oo bilaash ah</p> <p>Cuntooyin guriga laguugu keenayo muddo laba-todobaad ah oo loogu talagalay qofka dhalaya ee diiwaangashan iyo ilaa afar xubnood oo qoyska ka tirsan oo dheeraad ah</p> <p>Babyscripts: mowduucyo waxbarasho</p> <p>Taageerada iyo waxbarashada ee Text4Baby</p> <p>Faytamiinada dhalmada ka hor</p> <p>Barnaamijka Tallaabooyinka Koowaad ee Caafimaadqabka leh mid dhalmada ka hor ilaa hal sano ka-dib dhalmada</p> <p>Ka dooro mashiinka naaska lagu liso oo elektaroonig ah ama gacanta ku shaqeeya</p>	<p>Barnaamijka cunto-geynta labada-todobaad ah ee loogu talagalay hooyooyinka uurka leh iyo kuwa dhowaan dhaley</p> <p>Cunto-geynta 10-todobaad ah oo loogu talagalay haweenka uurka leh ee qaba cudurka sonkorowga</p> <p>\$100 oo kaarka hadiyadda ah si loogu iibiyo agab carruureed</p> <p>Ka dooro mashiinka naaska lagu liso oo elektaroonig ah ama gacanta ku shaqeeya</p>
Xirmada/ Taageerada Kala-guurka Nololeed	<p>Caawimaadda maareynta daryeelka shakhsiyeed si loo bixiyo agabka baahiyada aasaasiga ah oo bilaash ah (agabka musqulaha kabo, iyo qorsheeyaal, iyo kuwo kale)</p> <p>LGBTQIA+ Care Navigators waxay ku siinayaan taageerada iyo hagitaanka daryeelka lagu xaqiijinayo jinsiga</p>	<p>Waxbarashada xirfadada-nololeed oo loogu talagalay dhallinyarada 15-18 sano jirka ah</p> <p>Ilaa \$500 maaliyad ah oo loogu talagalay hawlaha kobcinta ee la xiriira yoolasha nolasha madaxbanaan</p> <p>Tababbaridda xirfadaha nolol maalmeedka</p> <p>Taageero waxbarasho</p> <p>Horumarin shaqo</p> <p>Tababbar mihnadeed</p> <p>Adeegyada shaqo geynta</p> <p>LGBTQIA+ Care Navigators waxay ku siinayaan taageerada iyo hagitaanka daryeelka lagu xaqiijinayo jinsiga</p>	<p>LGBTQIA+ Care Navigators waxay ku siinayaan taageerada iyo hagitaanka daryeelka lagu xaqiijinayo jinsiga</p>	<p>Barnaamijka On My Way (OMW): wuxuu gacan ka geystaa u diyaarinta xubnaha dhallinyarada in ay gaaraan baahiyadooda guri, shaqo, iyo maareynta maaliyadeed ee mustaqbalka</p> <p>LGBTQIA+ Care Navigators waxay ku siinayaan taageerada iyo hagitaanka daryeelka lagu xaqiijinayo jinsiga</p>	<p>Xirmada kala-guurka Nololaha oo bilaash ah oo la socda xirmooyinka gargaarka degdegga ah iyo ilkaha, bustaha xaaladaha degdegga ah, iyo kuwo kale</p> <p>Xirmada dhaawaca ee loogu talagalay dhallinyarada la soo gudboonaaday guri la'aanta</p>
Gaadiid	<p>Si toos ah u kasbo ilaa \$200 oo abaalmarin ah oo lagu adeegsanayo baahiyada gaadiidka</p>	<p>N/A</p>	<p>N/A</p>	<p>N/A</p>	<p>\$50 oo kaarka Orca oo loogu talagalay xubnaha ku nool degmooyinka King, Pierce, iyo Snohomish</p>

Dheefaha Qiimaha Lagu Darey	Coordinated Care of Washington, Inc 	Community Health Plan of Washington 	Molina Healthcare of Washington 	UnitedHealthcare Community Plan 	Wellpoint Washington (oo horey loo oran jiray Amerigroup) 
Jirdhis/Habnoleed Caafimaadqab leh (Xubinnimada Jiimka)	<p>Tababbar dhimista miisaanka jirka iyo taageerada dabeecadaha cunto cunista caafimaadqabka leh</p> <p>Taageerada ka-dib qaliinka miisaan dhimista iyo towjihinta</p> <p>Ablikeeshanka MyStrength oo leh qalab lagu yareynayo walaaca, niyadjabka, iyo isticmaalka maandooriyaha</p>	<p>Hagid laga helay tababbarayaal caafimaad waayo-arag ah, kalkaaliyayaal, iyo cunto-yaqaanno diiwaangashan si loo taageero nidaamyada caafimaadka ee cusub, maareynta baaritaannada, iyo qorshayaasha waxqabadka</p>	<p>Towjihinta maareynta miisaanka si ay kaaga caawiso in aad gaarto yoolkaaga miisaanka caafimaadqabka leh</p> <p>Wadatashiga nafaqada ee lala yeelanayo cunto-yaqaan diiwaangashan oo ay ku jirto qorsheynta cuntada iyo hagidda</p>	<p>Kalkaaliye caafimaad oo diiwaangashan oo khibrad u leh mowduuca una heellan kuwa qaba xaaladaha miisaanka</p>	<p>Kaar \$50 oo loogu talagalay xubinnimada jiimka ee xubnaha laga helay cudurka sonkorowga ama cayilka</p> <p>Dooro jirdhiska barta internet-ka ee caafimaadqabka leh</p> <p>Fawjarka WW (oo horey loo oran jiray Weight Watcher®) wuxuu Caymiyaa ujuurrada isdiwaangelinta, 13 toddobaad oo ah fasalo qof ahaan ah, iyo 14 toddobaad oo fasalo barta internet-ka ah</p>
Naadiyada/ Waxqabadyada Carruurta (4H, Naadiga Wiilasha iyo Gabdhaha ee loogu talagalay carruurta 6-18 sano jirka ah)	<p>Xubinnimada Naadiga Wiilasha iyo Gabdhaha oo bilaash ah</p> <p>Naadiga Carruurta Caafimaadqabta oo leh CC the Panda, iyo bah-wadaagta bixiyayaasha ah, oo carruurta ku hoggaaminaya safarkooda wanaagga iyo caafimaadka</p> <p>Isboortiga jirka oo bilaash ah</p>	<p>Xubinnimada Naadiga Wiilasha iyo Gabdhaha oo bilaash ah</p> <p>Isboortiga jirka oo bilaash ah</p>	<p>Xubinnimada Naadiga Wiilasha iyo Gabdhaha oo bilaash ah</p> <p>Isboortiga jirka oo bilaash ah</p>	<p>Xubinnimada Naadiga Wiilasha iyo Gabdhaha oo bilaash ah</p> <p>Isboortiga jirka oo bilaash ah</p>	<p>Xubinnimada Naadiga Wiilasha iyo Gabdhaha oo bilaash ah</p> <p>Xubinnimada 4H</p> <p>Adeegyada cashar-bixinta fogaan-aragga ah</p> <p>Xubinnimada YMCA ee loogu talagalay macaamiisha ku nool Wenatchee iyo Longview</p> <p>Isboortiga jirka oo bilaash ah</p>
Dheefta(aha) Maqalka/Aragga Loogu talagalay dadka waaweyn ee jira 21 iyo kuwa ka weyn	<p>\$100 loogu talagalay ookiyaale ama xuub-arageed</p>	<p>Ookiyaal lacag la'aan ah</p>	<p>Ookiyaal lacag la'aan ah oo laga helayo Zenni Eyewear</p>	<p>\$100 oo loogu talagalay ookiyaale *Aan ku habboonayn xubnaha Apple Health Expansion</p>	<p>\$100 oo loogu talagalay ookiyaale</p>
Kheyraadyada Telehealth	<p>Booqashooyinka fiidiyowga iyo telefoonka 24/7 oo bilaash ah si aad u weydiiso su'aalo, u hesho talo, u sameyso baaritaan, ama qoraalka daawada oo lala yeelanayo Teladoc ama bixiyayaasha shabakada ku jira</p> <p>Ablikeeshanka NeuroFlow app ee loogu talagalay taageerada caafimaadka habdhaqanka</p> <p>Ablikeeshanka Pacify App oo leh doulas oo 24/7 la helo karo, la-taliyayaasha naas-nuujinta, khadka Caawimaadda Dhibaataada iyo waxyaabo kale inta lagu guda jiro xilliga uurka iyo wixii ka dambeeya</p>	<p>Booqashooyin fiidiyow iyo telefoon 24/7 ah oo loo marayo Daryeelka Fogaan-aragga CHPW (CHPW Virtual Care)</p> <p>Caawimaadda barashada isticmaalka tiknoolajiyadda loogu talagalay daryeelka caafimaadka</p>	<p>Daryeelka deg-deg ah ee fogaan-aragga ee 24/7 (Teladoc)</p> <p>Pyx Health App: barnaamij bixiya wehel iyo kheyraad lagu taageerayo baahiyadaada caafimaadka dhimirka iyo jirka</p> <p>Shabakadeenna bixiyayaasha telehealth waxaa ka mid ah: Boulder Care, Bright Heart Health, Bicycle Health iyo Teladoc</p>	<p>Daryeelka fogaan-aragga ee lala yeelanayo UHC Doctor Chat</p> <p>Bright Heart Health: Khadka telefoonka xanuunka isticmaalka maandooriyaha ee 24/7</p> <p>Eleanor Health: caawimaadda isku-duwidda caafimaadka jirka ee loo marayo maamulayaasha daryeelka iyo adeegyada loogu talagalay baahiyada caafimaadka dhimirka</p> <p>BoulderCare: xalka telefoonka (telehealth) ee loogu talagalay xubnaha raadinaya daaweynta la qabsiga</p> <p>Charlie Health: Barnaamijka Bukaana-socodka Degdegga ah ee Shakhsiyeed ee dhallinyarada</p>	<p>Live Health Online</p> <p>Ablikeeshanka Wanaagga Dareenka</p> <p>Ablikeeshanka khilaawada ee carruurta</p>

Dheefaha Qiimaha Lagu Darey	Coordinated Care of Washington, Inc	Community Health Plan of Washington	Molina Healthcare of Washington	UnitedHealthcare Community Plan	Wellpoint Washington (oo horey loo oran jiray Amerigroup)
Barnaamijyada Abaal-marinta (Ilaa \$200 xubin kasta sannad kasta)	Kasbo ilaa \$200 oo loogu talagalay qaadashada tilaalka hargabka, booqashooyinka caafimaadka, baaritaannada iyo kuwo kale. Abaal-marinta waxaa si toos ah loogu daraa kaarka Visa ee lacagtiisa horey loo bixiyay oo loogu talagalay doorashooyinka caafimaadqabka leh	Barnaamijkeenna ChildrenFirst waxaa ka mid ah barnaamijyada Abaal-marinta Dhalmaada ka hor, Dhalmada kadib iyo Ubadka Wanaagsan Barnaamijka Abaal-marinta Ubadka Wanaagsan ee ka bilaabanaya laba toddobaad jir ilaa 18 Abaal-marinta loogu talagalay baaritaan kastoo ubadka wanaagsan ah, wadarta guud ee qiimaha ilaa \$200 sannadkii oo ah qaabka kaararka hadiyadda oo laga helo Target, Amazon, ama Safeway	Kasbo ilaa \$200 oo kaararka haddiyadda ah sannadkii oo loogu talagalay daryeelka naftaada iyo qoyskaaga adiga oo sameynaya adeegyada iyo baaritaannada ka hortagga ah	Kasbo abaal-marinnada loogu talagalay sameynta adeegyada ka hortagga ee muhiimka ah oo ay ku jiraan booqashooyinka ubadka wanaagsan, tallaalada, baaritaanka kansarka naaska, korjoogteynta sonkorowga, iyo in kale \$200 xubin kasta sannadkii	Ilaa \$200 abaalmarino ah sannadkii
Adeegyada Dheeraadka ah (Irbad isku daaweyn, Gudniin, iwm.)	Qiimo-dhimista Amazon Prime Telefoon casri ah oo bilaash ah oo leh farriimo qoraaleed aan xaddidnayn, wacitaanno bilaash ah oo lala yeelanayo Coordinated Care iyo khadka la-talinta kalkaalisada oo 24/7 ah Buuxinta Daawooyinka 90-maalin: ikhtiyaarka in qoraalka daawada boostada laguugu soo diro gurigaaga ama aad ka soo qaadata farmashiyaha Iska-dhaaf isticmaalka sigaarka iyo tubaakada kale adigoo helaya taageero towjihiin iyo kastam	Qiimo-dhimista Amazon Prime Iskujirka 20 booqashooyin sannadkii oo loogu talagalay taageerada walbahaarka iyo xanuunka oo ay ku jiraan hababka irbad isku daaweynta, gacan ku daaweynta, iyo duugis ku daaweynta (shabako furan, wax gudbin ah ama oggolaanshiyo hore looma baahna) Taageerada sigaarka jooji Gudniinka Sahay daawo 90-maalin ah oo loogu talagalay inta badan xaaladaha daba-dheeraada	Qiimo-dhimista Amazon Prime Pyx Health App: barnaamij bixiya wehel iyo kheyraad lagu taageerayo baahiyadaada caafimaadka dhimirka iyo jirka Buuxinta Daawooyinka 90-maalin: ikhtiyaarka in qoraalka daawada oo boostada loogu dirayo guriga xubinka ama uu ka soo qaadano daawooyinka farmashiyahiisa Caawimaadda sigaar joojinta loo marayo Barnaamijka Joojinta Tubaakada My Health ee Molina	Qiimo-dhimista Amazon Prime Buuxinta daawooyinka 90-maalin: ikhtiyaarka in qoraalka daawada oo boostada loogu dirayo guriga xubinka ama uu ka soo qaadano daawooyinka farmashiyahiisa Quit for Life: taageerada joojinta nikotiinta UHC App: caafimaadkaaga ku maaree barta internet-ka ama adigoo mashquulsan Ka helidda macluumaadka caafimaadka telefoonka gacanta oo uu ku jiro kaarka aqoonsiga xubinka, dheefaha hadda, dhakhtar hel, iwm.	Qiimo-dhimista Amazon Prime 7 kulan oo irbad isku-daaweyn ah Shahaadda Hawsha oo Bilaash ah oo loogu talagalay shaqada Imtixanaadka-GED oo bilaash ah Faa'iidooyinka daawo dhaqameedka loogu talagalay xubnaha Hinddida Mareykanka iyo Dadka Asal Ahaan u dhashay Alaska (oo ay ka mid yihiin mundulka loo yaqaanno sweat lodge, gubidda, sheeko sheegidda, iyo goobo wadaagista) \$150 gudniinka bixiyaha shabakada ku jira Xirmada Hargabka Safmarka ah oo Bilaash ah

Helidda dheefahan waxay ku xiran tahay xaq-u-yeelashada Apple Health. Badeecooyinka iyo adeegyada lagu sharxay shaxda kor ku xusan laguma bixiyo ama laguma damaanadqaadin Apple Health ama Apple Health Expansion. Helitaanka dheefahan kuma xidhna hannaanka rafcaannada ee Apple Health. Khilaaf kastoo la xiriira badeecooyinkan iyo adeegyadan waxaa ku waajibi kara hannaanka cabashada qarshaha daryeelka la maareeyo.